


DISCOVER ITS BEAUTY

Qaybta 5aad

# Allaah

(Allaha Keliya ee Runta ah)

# MAGACYADA QURUXDA BADAN EE ILAAHAY

DR. NAJI IBRAHIM

بسم الله الرحمن الرحيم

## Magaca Alle yaan ku billaabaynaa,

Allaha Naxariista guud iyo mida gaarka ahba Naxariista

# Allaah (Allaha Keliya ee Runta ah)
# MAGACYADA QURUXDA


Qur'aanka Kariimka ah iyo Nebi Muxammad (Naxariis iyo Nabadgelyo Korkiisa ha ahaatee) waxay wax inaga barayaan Magacyada Alle, Ilaaha Keliya ee Runta ah. Tusaale ahaan, Qur'aanku wuxuu leeyahay:

- ***"Alle waxaa u sugnaaday magacyo wanaag badan, ee ku barya (ugu yeera)"*** (7:180)

Marka aynu ducaysanayno ee Alle baryeyno, waxaa la innagu boorinayaa inaynu Alle ku barino Magacyadiisa quruxda badan ama magaca ku habboon ee la xiriira baryadeena ama baahideena. Tusaale ahaan, haddii ducadeenu khusayso raadinta risiqa iyo khayraadka nolosha, waxaa fiican inaynu Alle ku barino magaciisa Al-Rasaaq, Risiq-bixiye. Magacyadani ma muujinayaan inuu Ilaahay ka badan yahay hal; waa magacyo sharraxaya sifaadaka kala duwan ee Ilaahay, Allaha Halka ah ee Runta ah.

Ka Bani Aadam ahaan, Marna ma fahmi karno weynaanta Alle, laakiin hadba inta ay le'eg tahay aqoonta aynu u leenahay Isaga iyo waxa raali geliya, ayey le'ekaan doontaa jacaylka iyo cibaadada aynu u hayno. Barashada Allaah - barashada iyo fahamka Magacyada Ilaahay iyo sifooyinkiisa waxaan ka helaynaa degenaansho maskaxeed noloshan hadda iyo tan xigtaba sababtoo ah waxaynu qiraynaa in wax kasta ku jiraan Alle gacmihiisa kuna dhacayaan Idankiisa.

Sax maahan in Bani Aadamku adeegsado magacyada Ilaahay oo keligood ah. Muslimiintu waxay leeyihiin magacyo ku bilaabma Cabdul (oo la macno ah "Addoonkii") laguna xijiyo mid ka mid ah




# AR-RAXIIM

Waa Allaha ugu Naxariista Badan. In kastoo aynaan marnaba ku dhawaan karayn heerka naxariistiisa, waynu ka mahadnaqi karnaa oo isku dayi karnaa intii karaankeen ah inaan u naxariisano dadka kale.


magacyada Ilaahay. Sidaas darteed, Cabdullaahi wuxuu la macno yahay "Addoonkii Allaah", "Cabdulraxmaan" wuxuu la macno yahay Addoonkii "Raxmaan" (Allaha Naxariista badan), iyo sidaas oo kale.

Inaan magacyada Ilaahay si fiican u barano, Allaheena dhabta ah, iyo inaan si dhab ah u rumayno Isaga iyo Sifooyinkiisa, waxay innagu hagaysaa inaan maskaxda ku hayno, in markasta oo aan la falgalno dadka kale in Ilaahay uu yahay: Allaha Naxariista badan, Naxariis guud leh, Mid Gaarana Leh, Xakiim ah, Wax walba Og, Wax Walba Arka, Cafis Badan, Naxariis Badan, Run ah, iwm.

Waa muhiin in aynu sifooyinkan quruxda badan ku camalfalno nolosheenana ku dhaqano, illaa iyo inta ay awoodda iyo karaanka Bani Aadamku saamaxayo.



**Hadda, aan wax badan ka barano magacyada Allaah**



## AS-SALAAM

السلام

Isha Nabadda iyo Dhammeystirnaanta, Kaas oo ka maran wax kasta oo nuqsaan ah. Markasta Ilaahay waa kaamil mana laha Sifooyinka Bani Aadamka sida inuu xanuunsado, gaajoodo, harraado, ama dhaxamoodo.

# Magacyada Quruxda Badan ee Ilaahay

**Kuwani waa magacyada quruxda badan ee Alle oo af Carabi ku qoran oo ay la socdaan micnahooda oo af Soomaali ku qoran:**

***Allaah:*** Waa magaca saxda ah ee Allaha Halka ah ee Runta ah.

***Ar-Raxmaan:*** Allaha Naxariista, Naxariista Gaarka ah iyo mida Guudba, oo u naxariista dhammaan makhluuqa.

***Ar-Raxiim:*** Waa Allaha ugu Naxariista Badan. In kastoo aynaan marnaba ku dhawaan karayn heerka naxariistiisa, waynu ka mahadnaqi karnaa oo isku dayi karnaa intii karaankeen ah inaan u naxariisano dadka kale.

***Al-Maalik:*** Allaha Boqorka ah, ee leh mulkiyadda dhammaan Samooyinka iyo Dhulka.

***An-Noor:*** Iftiinka, Allaha Nuurka ah ee leh iftiinka ina haga. Suuradda An-Nuur ee Qur'aanka ku jirta Alle wuxuu inoogu sheegay ***"Inuu Alle yahay ilayska samooyinka iyo dhulka."*** (24:35)

***Al-Qudduus:*** Allaha Barakaysan, Baraxtiran, ee Barakaysan.

***As-Salaam:*** Isha Nabadda iyo Dhammeystirnaanta, Kaas oo ka maran wax kasta oo nuqsaan ah. Markasta Ilaahay waa kaamil mana laha Sifooyinka Bani Aadamka sida inuu xanuunsado, gaajoodo, harraado, ama dhaxamoodo.



# AR-RASAAQ




Risiq-bixiye, kaas oo siiya irsaaqadda, amniga iyo hanuunka wax kasta oo nool. Mid kasta oo innaga mid ah wuu heli doonaa irsaaqaddii loo qoray, laakiin waa inaan kasbano oo u shaqaysanno - qaab xalaal ah oo la oggol yahay, in kastoo aan la ogolayn qaab wax isdaba marina ama musuq ah.

# Magacyada Quruxda Badan ee Ilaahay
## (socd.)

***Al-Basiir:*** Kan Wax walba Arka, kaas oo daalacda wax kasta oo ka socda guud ahaan kownka.

***As-Samiic:*** Kan Wax-walba Maqla, kaas oo wax kasta maqla. Marka aynu baryeyno ama ducaysanayno, Wuu ina maqlayaa.

***Al-Cadiim:*** Allaha Wayn, Kaas oo ka wayn wax kasta ama cid kasta oo Makhluuqiisa ah.

***Al-Qafuur:*** Allaah dhaafa dembi kasta, Kaas oo u dambi dhaafa kuwa toobad keena oo u soo laabta Dhankiisa.

***At-Tawaab:*** Kan Aqbal Toobadda. Ilaahay wuxuu jecel yahay inay dadka dambaaba u toobad keenaan, Isna si joogto ah ayuu u soo dhaweeyaa oo uga aqbalaa towbadda dhabta ah. Taas beddelkeeda, Bani Aadamku, xitaa kuwa innoogu dhow, ugu dambeyntii way ka daalaan aqbalista khaladaadkeena iyo inay innagu soo dhaweeyaan xamaasad tii hore la mid ah.

***Al-Caali:*** Kan U Sarreeya, Ugu Korreeya, ee ka sarreeya dhammaan waxyaabaha uu Abuuray.

***Al-Waduud:*** Allaha ugu Jacaylka Badan, ee jecel kuwa toosan ee hogaansan, ee jacaylkaas inooga dhex muujiya nolosheena maalinlaha ah. Waa in aynu ka xamdi naqno Jacaylka Ilaahay, waa inaan sidoo kale jeclaano dadka kale innagoo la jeclaanayna waxa aynu nafteena la jecel nahay.

# AL-WADUUD

الودود

Allaha ugu Jacaylka Badan, ee jecel kuwa toosan ee hogaansan, ee jacaylkaas inooga dhex muujiya nolosheena maalinlaha ah. Waa in aynu ka xamdi naqno Jacaylka Ilaahay, waa inaan sidoo kale jeclaano dadka kale innagoo la jeclaanayna waxa aynu nafteena la jecelnahay.

# Magacyada Quruxda Badan ee Ilaahay
## (socd.)

***Al-Xakam:*** Garsoore, kaas oo Xukunkiisa dhammeystiran yahay ee aan sinnaba looga baxsan karayn.

***Al-Caliim:*** Kan Wax-walba Og, Kaas oo og wax kasta oo muuqda iyo dhammaan wixii qarsoon; wixii la soo dhaafay, kan jooga, iyo midka soo socda. ***"Ma Jirto Caleen Dhulka ku soo dhacaysa, Haddii ay jirtona wuu og yahay."*** (6:59)

***Ar-Ra'uuf:*** Allaha ugu naxariis badan, ugu debecsan, deggan, naxariis badan ee naxariistiisu bilaa xadka tahay.

***Ar-Rasaaq:*** Risiq-bixiye, kaas oo siiya irsaaqadda, amniga iyo hanuunka wax kasta oo nool. Mid kasta oo innaga mid ah wuu heli doonaa irsaaqaddii loo qoray, laakiin waa inaan kasbano oo u shaqaysanno - qaab xalaal ah oo la oggol yahay, in kastoo aan la ogolayn qaab wax isdaba marina ama musuq ah.

***Al-Xaq:*** Kan Runta ah, Allaha Keliya ee Runta ah, Kaas oo Kelmadihiisu xaq yihiin. Maadamaa aynu og nahay in Ilaahay lid ku yahay wax kasta oo been ah, waa inaanu ku dedaalno inaan ka run sheegno wax kasta oo aan dhahayno ama sameynayno innagoo oo aan u eegayn in runtu noo dan tahay ama naga soo horjeedo.

***Al-Xaliim:*** Dulqaad badanaha, Deggan, dulqaata, ee marnaba salfududaan, xitaa aan ku salfududaan dambiilayaasha, xumaan falayaasha, iyo kuwa dafira ama ka gaalooba Isaga. Ilaahay wuu inoo dhaafa gefafkeena, innana waa inaynu ku dedaalno cafinta dadka innagu hareeraysan sababtoo ah run ahaantii, cuqdadu waxay wax yeeshaa cidda caloosha ku haysata oo qudha.



# AL-MUJEEB

المجيب

Midka ajiibiya, ee aqbala baryadayada. Eebe wuxuu jecel yahay inaan waydiisanno gargaarkiisa ducooyin, wuxuuna jecel yahay inuu innaga aqbalo ducada.

# Sifooyinka iyo Astaamaha Alle (Allaah)

Sifooyinka iyo astaamaha keliya Ilaahay u gaarka ah ee lagaga garto cidda kale ee sheegata Ilaahnimo waa:

- Allaha Kelida ah ee Runta ah sifooyinkiisu waa kuwa isaga u gaar ah. Ilaahay Cid la mid ah ma jirto, mana jiraan wax sifooyin Aadane ama xayawaan ah oo loo nisbayn karo.
- Allaha xaqqa ah waa Abuure, Lama abuurin lamana dhalin.
- Allaha Kelida ah ee Runta ah wuxuu inoo abuuray inaan kelidi caabudno. Marka aynu Ilaahay kelidii caabudno, waxaaynu ka xorownay caabuditaanka asnaamta, Awliyada, dadka caanka ah, lacagta iyo wax kasta oo kale.
- Allaha Runta (Allaah) waa MID KELI AH, ma aha saddex iyo wixii ka badan! Ma laha cid la shirko ah ama u dhiganta.
- Bani Aadanka iyo noolaha kale Allah (Ilaahay) kuma arki karaan noloshan Adduunka.
- Ilaahay (Allaah) ma jirto cid metesha ama isu soo ekaysiin karta oo Makhluuqiisa uu abuurtay ka mid ah.
- Allaah (Ilaahay) wuu jiri doonaa weligii; ma dhinto ismana beddelayo.
- Ma jiraan cidd ama wax Allaah (Ilaahay) u baahdo, sida hooyo, xaas, wiil; uma baahdo cunto, cabitaan, ama caawimo noocay doonto ha ahaatee. Isaga ayey makhluuqa kale u baahan yihiin.

Shuruudahan iyo sifooyinkan (iyo sidoo kale sifooyinka kale ee Ilaahay kelidii u gaarka ah) ayeynu ku qiimeyn karnaa oo ku garan karnaa cidda ama waxa kale ee Ilaahnimo (Rabbinimo) sheegta.

# Ma xiisaynaysaa inaad wax dheeraad ah sii ogaato?

Haddii aad xiisaynayso inaad ogaato macluumaad iyo tafaasiil dheeraad ah oo ku saabsan Islaamka, fadlan booqo shabakadayada:

**www.discoveritsbeauty.com**

**Taxanaha Lagu Soo Bandhigayo Quruxda Islaamka:**

**1. Kaliya Tallooyinka Aysbaaga**

**2. Diinta Aadam Iyo Xaawo**

**3. ABC-yada Islaamka**

**4. Ka Jawaabista Su'aalaha Muhiimka Ah Ee Aadanaha**

**5. Magacyada Quruxda Badan Ee Ilaahay**

**6. Waxyigii Ugu Dambeeyay**

**7. Rasuulkii Ugu Dambeeyay**

**Shabakado Islaaml Ah Oo Faa'Ildooyin Badan Leh:**

http://www.allahsquran.com

http://www.quranexplorer.com

http://www.islamhouse.com

http://www.edialogue.org

http://www.islamreligion.com

http://www.newmuslimguide.com

http://www.guidetoislam.com/en/

# Qiritaanka iimaanka
## (Albaabka Islaamka)

“Waxaan qirayaa in uusan jirin mid xaq lagu caabudo Ilaahay mooyee, waxaana qirayaa in Muxammad uu yahay Rasuulkii Ilaahay”.


Carabi ahaan, waxaa loo akhriyaa:


أشهد أن لا إله إلا الله وأشهد أن محمدا رسول الله

Oo sidaan loogu dhawaaqo:

**ASH-HADU ALLA ILAHA ILLA ALLAH,**
**WA ASH-HADU ANNA MUXAMMADAN RASUULU ALLAH.**

Tani waa qirida iimaanka ee loo baahan yahay inuu qofku ku dhawaaqo si uu u Islaamo; waxay soo koobaysaa xaqa, quruxda, iyo sahalka Islaamka.






GLOBAL ACADEMY FOR TRANSLATION AND EDUCATION (GATE)
LONDON | THE UNITED KINGDOM

Waxaa Turjumay Al-Andalus Group LTD
www.alandalusgroup.org

كتاب أسماء الله الحسنى باللغة الصومالية